

Miisaaniyada 2015-2016-ka ee Guddoomiyaha Degaanka Multnomah Deborah Kafoury

Waa in aan war kaa maqalnaa!



Degaanka Multnomah

Degaanka Multnomah waxay hoy u tahay in ka badan 735,000 oo degan; In ka badan 100,000 oo ka kala yimid 100 dawladdood ayaa ku hadla wax ka badan 90 luqadood.

Degaanka Multnomah waxaa xukuma guddi maamul oo la soo doortay oo ka kooban afar xubnood iyo hal guddoomiye. In ka badan 4,500 oo ah shaqaalaha Degaanka Multnomah ayaa bixiya adeegyo kala duwan, oo ay ka mid yihiin daryeelka ilkaha iyo caafimaadka ee laga bixiyo xarumahayaga, fasalada ku hadalka Af-Ingiriiska ee laga bixiyo maktabadaha aanu leenahay, cunto siinta dadka waayeelka ah ee la adeegsanayo hay'adaha aan wada shaqayno ee IRCO, Xarunta Caafimaadka & Adeega Aasiyaanka 'Asian Health & Service' iyo El Programa Hispano.

Egida Miisaaniyada

Miisaaniyada sanad kasta ee Degaanka Multnomah waa \$1.4 bilyan. Inta badan lacagtaasi waxay ka timaadaa dawladda federaalka iyo gobolka. **Waa tan sidii lacagtaasi loo kharash gareeyay.** →

Qayb yar oo ka mid ah, oo ah qiyaastii \$454 bilyan, ayaa cashuur ahaan degaanka looga soo urriyay. Lacagtaasi waxaa loo yaqaan "Dhaqaalaha Guud" iyadoo Guddiga Maamulka ee Degaanku ay go'aan ka gaaraan sida loo kharash garaynayo. **Waa tan sidii lacagta Dhaqaalaha Guud loo kharash gareeyay.** →

Dadka la wadaag Fikradahaaga

Waxaan u baahanahay taageeradaada si aan go'aano fiican uga qaadano sida loo kharash garaynayo lacagta dadweynaha. Haddii aadan rabin in aad ka hadasho madasha dadka u furan, waxaad xafiiska Guddoomiyaha Deobrah Kafoury kula xiriiri kartaa email ama telefoon.

Luqad kasta wax noogu soo qor. Waxaan xaqiijin doonaa in ra'yigaaga lagu turjumo Af-Ingiriis. Haddii aad doorbidayso in aad telefoon ahaan ra'yaagu ku dhiibato, fadlan nala soo socodsii haddii aad jeclaan lahayd turjumaan iyo luqadda aad doorbidayso. Waxaan qorshayn doonaa in la helo turjumaan diyaar ah.

- Qareenka Degmada \$27.9 milyan
- Maktabada \$69.3 milyan
- Cadaalada Bulshada \$91.4 milyan
- Ka baxsan waaxyaha \$108.1 milyan
- Mas'uuliyiinta Ammaanka . . . \$128.0 milyan
- Maamulka Degaanka \$135.3 milyan
- Waaxda Caafimaadka \$167.6 milyan
- Adeegyada Bulshada \$195.3 milyan
- Hantida Degaanka \$230.2 milyan
- Adeegyada Dadweynaha . . . \$239.7 milyan

- Qareenka Degmada \$21.6 milyan
- Maktabada \$0 milyan
- Cadaalada Bulshada \$58.7 milyan
- Ka baxsan waaxyaha \$ 24.8 milyan
- Mas'uuliyiinta Ammaanka . . . \$112.1 milyan
- Maamulka Degaanka \$33.5 milyan
- Waaxda Caafimaadka \$96.1 milyan
- Adeegyada Bulshada \$13.2 milyan
- Hantida Degaanka \$6.1 milyan
- Adeegyada Dadweynaha . . . \$61.3 milyan



501 SE Hawthorne Blvd., Suite 600, Portland, OR 97214 • 503- 988-3308 • mult.chair@multco.us